# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Kal-fadhigii 41aad Fadhigii 17aad

**Isniin 11, November 2019**

**Quraanka: -** Md. Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

Ajandaha Fadhiga: - Doodda Xeerka Garyaqaanka Guud ee Qaranka

**Md. Cali Maxamed Aaden (Cali-barre)** **(1min 25sec):-** Xeerkan ay so gudbisay xukuumadumagacaciisu waxa weeyexeerka xafiiska garyaqaanka guud ee qaranka Guddiduna waxay kusoo qortay Garyaqaanka guud ee xukuumada marka aniga waxay ila tahay inuu sax ku yahay sida xeerka lagu soo gudbiyay. Garyaqaanka guud xukuumada gaar uma aha waa qaranka oo dhan buu uyahay garyaqaanku hadaanad xukuumada dey intay odhan lahayd waxaan ka fiicnayd inay yidhaahdan dowladdu saddexda waaxood ee qaranku ka kooban yahay marka magacu wuxu sax ku yahay garyaqaanka guud ee qaranka **Jamhuuriyada Somaliland-(point)** waa kala laba shaqo weeyan waxa kala soocaya xeerarka ukala soocaya nin walba wuxu uleeyahay markaa aniga qodobka sidaasay ila tahay inta xeerka waan eegay waan waafaqsanahay qodobka ay gudidu xukumadu sheegtay halaga badalo odhan lahaa.

**Md. Maxamed Faarax Qabile** **(3min 14sec):-** Sidaa u sheegay **Xil** Cali Barre dastuurku wuxu uqaybinayaa saddex waaxood bu uqaybinaya qaranka waaxda Garsoorka, Xeer-dajinta, Fulinta. Meelo wuxu ka tilmaamaya xeerku horta marka hore saddexdii waxood waa inay kala baxaan een **Attorney general,** kuwaa garyaqaanka guude qaranka **Legal of pressure** buu leyahay Madaxweynuhu **Completely** xeerka saldhig dastuuriya kuma laha dastuurka Somaliland.

Kala xadayntii qodobkaasi saddexda waaxood buu kaso horjeeda wuxu melaha qaarka tilmaamayaa inuu yahay ku xigeenka xeer ilaaliyaha guud ee qaranka arrin kaasi waa arrin khaldan waa arrin qayral dastuuri ah waa arrin aan saldhig ku lahayn ilaa iyo xilkii xukuumadii **Silaanyana** arrimahaasi khilaafka ku dhacayay xeerarka dalka iyo dastuurka waaxad modaa malin walba dilaacoodu inuu si kordhaayay sidaa daradeed anigu waxaan leeyahay qodobka **128aad** ee dastuurka qaranka wuu ka soo horjeeda iyo kala xadaynta awoodaha qaranka labdaba sidaa daradeed xeerkan sidiisa waa inuu goluhu u celiya akhris danbena lagu celiyaa ee dagaalka laga daaya dastuurka iyo

siisiibadka ku dhacaya xeerarka ka baxaya golahan ee aan qarada lahayn waxaan leeyahay arrinkaasi laba melood lagama soo **Absominate** garayn karo waaxda garsoorka ma noqonkaro ku xigeenka xeer ilaaliyaha guud ee qaranka waa legel Advisor kamana tirsana waaxda xeer ilaaliyaha guud.

Sidaa daradeed Madaxweynuhu wuxu yeelan kara Legal adviserla taliya oo uu arrimaha kala tashado laakiin waxaad modaa awoodi xeer ilaaliya guud ee qaranka qaybsatay oo qayb ay iska qaadatay fulintu arrintaasina arrin suurta gala maaha waxaan leeyahay arrintaasi ama xeerkasi wuxu ku wanaagsan yahay garyaqaanka guud ee qaranka waxa loo yaqaana xeer ilaaliyaha guud ee qaranka mana noqonayso waa Legal Advisorama la talye sharci een mana laha awooda intaa leeg ee lagu baahinayo, xaaran na wuu ka yahay dastuurka qaranka inuu golahana ka baxaana waa xaraan.

**Md. Maxamed Xuseen X. Ciise** **(3min 45sec):-** Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaaal xeerkan runtii horta waa xeer kooban ba.

Garyaqaanka guud wuxu ku jiray xeerka nidaamka garsoorka barigii hore kan danbe ee igu danbeeyay in laga saaray ma garankaro laakiin bariga hore wuxu ku jiray xeerka nidaamka garsoorka hore,

Shaqooyinkiisa isagoo magacaabaya waxaa soo dhana waxay ku yaaleen xeerka nidaamka garsoorke hore marka hadii waxaan moodayay xeerkan ugu danbeeyay nidaamka garsoor ee aanu ansixinay inay guddidu yidhaahdeen madaama uu xafiisku gaaryahay hala kala saaro oo markaa xeerkii inay ka saareen ban jecelahay dabadeedna sidaa loogu sameeyo xeerka gaarka ah horta golihii sharcigu wuu inoo wada fadhiyaa laakiin anigu waxan odhan lahaa xeerku waa **25** qodob guddiduna dhammaan way soo wada eegeen marka isagoo kooban anigu waxaan leeyahay sida guddida haloo qaato.

Garyaqaanku bahda dastuurka madaama ka mid ahayn waxay noqonaysaa inuu ka mid yahay waaxda fulinta ayuu u noqonaya la taliye sharci ama wuxu noqonayaa Meesha laga faafiyo xeerarka ama xeerarka dowladu gacanta ku hayso iyadoo eegaysa markaa madaama uu yahay qayb ka tirsan ama xukuumada hoostagaysa waxaan odhan lahaa sidaa ay guddidu u daayeen oo halaga dhigo waa inuu noqdo garyaqaanka xukuumada halaga dhigo oo qaranka yaan laga dhigin baan odhan lahaa sida guddida ku raacsanahay anigu een dhamaan waxka badalka guddida waan taageerayaa.

Meelo yar ban doonaya aan cadaan ahayn **Qodobka 7aad** waxba ka dhiman waxay yidhaahdeen sababta aan qodobka wax uga badalnay ayay sheegeen markaa halka hoose waxay ku shegayaan **Qodobka 7aad** si toosa ayuu uga horimanaya **Qodobka 74aad** ee dastuurkaoo awood u siinaya xukuumada usoo bandhigida Wasaarada sharciyada golayaasha sharci dajin waxa kaloo uu ka hor imanayaa **Qodobka 47aad** xeerka kala

xadaynta xukuumada,oo hawlaha isku xidhka isku gudbinta mashaaricda sharci oo awood u siinaya Wasaarada xidhiidhka golayaasha markaa qodobkani waxa uu samaynayaa iska hor imaad xeerarka hore loo ansixiyay markaa waxaan soo jeedin lahaa sida hoos ku qoron markaa taasina kuma jirto Meesha waan ka waayay sidan ku qoron waxayna galeen un waxa Meesha ku yaala **Qodobkii 8aad** marka waxaan odhan lahaa halkaa hala cadeeyo sida hoos ku qoron bay yidhaahdeen markaa halkaa ay ka khaldan tahay iyo waxa ka dhiman marka dibaa loogu noqonayaa ban umalaynayaa guddiduna way cadayn doonta waa la eegi doona sida kale dhamman waxaan ku raacsanahay soo jeedinta guddida.

**Md. Axmed Barkhad Obsiiye** **(2min 40sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka iyo xildhibaanada Golahaba dhamaantood waan salaamayaa, xeerkani waa sidaa uu xildhibaankii iga horeeyay ee Cali-Barre uu sheegay ee ah Xeerka Garyaqaanka Guud ee maaha sida ay xildhibaano badani sheegayaan, xeerkana markii aan yara akhriyay waxaabad moodaa in xeerkuba uu ku dhanyahay Qodobka 7aad sidaa awgeed waxaan anigu soo jeedinayaa in xeerka loo qaato sidii xukuumaddu u soo gudbisay loona ansixiyo waanan ka baxay waad mahadsantihiin.

**Md. Abdiqaadir Jaamac Xaamud** **(3min 02sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka, xildhibaanada, saxaafada iyo marti sharaftaba waan salaamayaa; run ahaantii xeerkani waa xeer muhiim ah baahina loo qabo sidaa la sheegay hadii aan is dultaago ***Qodobka 3aad: Ujeedada Xeerka*** *waxaan soo jeedinayaa in lagu daro*Iyo wixii heer caalami ah ee loo baahdo waayo waxaa loo baahanyahay Tadawuraad markaa intaa in lagu daraana waa muhiim.

**Qodobka 8aad: Qaab-dhismeedka Xafiiska** waxaan soo jeedinayaa in lagu kordhiyo farqad kale oo ah; ***Waaxda Arrimaha Dibada.***

Xeerkani waa xeer aad iyo aad u muhiim ah waxaanan soo jeedinayaa in xeerkan sidiisa lagu ansixiyo waad salamaantiniin.

**Md. Ibraahim Jaamac Cali (Rayte)** **(7min 04sec):-** Mudane Gudoomiye, mudanayaal xeerkan ina horyaalaa waxaan u arkaa marka hore xeer aan aad looga soo shaqayn oo iska hor iyo daba imanaya, marka labaad waxaan jecelahay in aynu isla fahano garyaqaanka guud maaha institution la dhisayo maaha Garyaqaanka Guud; garyaqaanka guud caadiyan waa qof ka tirsan Xukuumadda dalalka aduunkana inta badan wasiirka Cadaalada ayuunbaa ah garyaqaanka guud.

Sida xeerkani hada uu u samaysanyahayna waxaa ka muuqata in uu institution dhisayo awoodaha halkan ugu qorana ay ka balaadhanyihiin tii garyaqaanka Guud, waxaanad moodaa in uu hawlihii Xeer-ilaaliyaga guud uu liqayo.

Garyaqaanka Guud shaqadiisu waa laba.

1. In uu maxkamaddaha ka difaaco Dawladda kiisaska madaniga ah ee ay xukuumaddu dhinac tahay dhinaca kalana ay tahay shaqsi ama shaqsi sharci iyo
2. In uu xukuumada siiyo la talin sharci (Legal Advice).

Awood intaa dhaafsiisan oo uu dawladda ku leeyahay ma jirto, wasaaradahana, wasaarad walba waxay leedahay nidaam ahaan lataliye sharci, wasiir walbaana waxaa waajib ah in uu yeesho lataliye sharci, xilkiisuna waxa uu ku eegyahay inta ay xukuumadaasi jirto waxaana magacaaba Madaxweynaha.

Hadii aad eegto shuruudaha erigiisa ee meesha yaalaa wax loo baahanyahay maaha oo madaxweynaha ayaa magacaaba isagaana erya, waxaanu uu la mid yahay sida wasiirada loo magacaabo loona eryo.

Inta badan hawlaha halkan ku qorani hawlihiisii maaha, sida ka muuqata xeerkana qodobka 7aad iyo qodobka 17aadna way isku soo noqnoqonayaan waanay isdul saaranyihiin.

Sidaa awgeed anigu waxaan qabaa in xeerkani dib loogu noqdo loogana soo shaqeeyo oo shaqada kooban ee garyaqaanka guud aynu ku soo koobno xeerka waana in meesha laga saaraa wixii xeer-ilaaliyaha guud shaqadiisa galaya oo ah la talinta xukuumadda iyo in uu maxkamadahana ka matalo xukuumada ayay ku soo koobmaysaa shaqadiisu garyaqaanka guud.

Sida ku qoran xeerka ee loo sheegay Garyaqaanka Guud ee Qaranka, maaha ee waa *Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda* markaa waxaan soo jeedinayaa in xeerka si wanaagsan looga soo shaqeeyo wixii aan awoodihiisa aan ahayna laga saaro ee xad gudubka ku ah waanad mahadsantihiin.

**Md. Maxamed Cali Xirsi (Obama)** **(3min 04sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoon ahaan iyo xildhibaanadaba waxaan ku salaamayaa salaanta islaamka Asc Wr Wbt, mudane Gudoomiye waxaan xoojinayaa xildhibaankaa iga horeeyay garyaqaanka guud maaha wasaarada, halkana waxaa loogu soo sameeyay Xeer aad u balaadhan, xeerkaa balaadhan ceeb ayay inagu tahay in xildhibaanada qaar ka mid ahi ay yidhaahdaan duuduub halagu ansixiyo, waxaa halkan ka muuqata in aanay akhriyin, waxaa halkan ka muuqata in aanay famin, waxaa halkan ka muuqata in uu xeerkani meelo badan isku Balaadhinayo oo uu shaqadoodii qaadanayo oo ay xeer-dejintu ay ku jirto oo ay xeer-ilaalintu ku jirto sidaa uu Rayte sheegayo ama sadexda Hay'adoodba, garyaqaankuna waa shaqsi awood uu isku balaadhiyana malaha, awood uu xeerkaa inoogu keeno oo uu ansixiya yidhaana ma laha, markaa shaqo shaqadiisa ka balaadhan ayuu halkan ku xadayaa.

Garyaqaanka guud waa shaqsi ku matala dawlada qodobadaa la soo sheegay oo ah in uu waxaan halkan ka ansixino uu faafiyo umadana gaadhsiiyo iyo in uu xukuumada kala taliyo xeerarka ay inoo soo gudbinayaan ee ay wasaaraduhu soo Curiyaan iyada oo wasaarad kastaana leh ama xaq u leh in ay yeelayo lataliye u gaar ah oo xeerarka usoo dejiya iyad oo uu garyaqaaka guud uu leeyahay in uu hubiyo xeerarkaasi in ay waafaqsanyihiin Dastuurka.

Garyaqaanka guud halka hada waxa uu iska dhigay Hay'ad madax banaan waxaa uu iska dhigay wasaarada, sidoo kale waxaa uu halkan ku qoray shuruudo lagu eryi karo mana aha sidaa ee Madaxweynaha ayaa Doortay isagaana eryi kara.

Mudanayaal iyo Gudoomiye waxaan leeyahay waxaas oo kale in ay ina dhaafaan maaha, malaha waxaa la is leeyahay Golahani wuu dhamaanayaaye ku xada, waxaan anigu leeyahay ama aan soo jeedinayaa in waxyaabahaa aad isaga hubino aadna uga taxadarno waxyaabaha noocan oo kale ah ee wasaaradaha ama waaxyaha kale lagu curyaaminayo waa in la joojiyaa hadii laga fursan waayana waa in gudi madax banaan loo saaro wsc.

**Point of order Md. Xuseen Axmed Caydiid,** Mudane Gudoomiye ka gudi ahaan markii aanu ka soo shaqaynaynay waanu aragnay in xeerka ay ku jirto is balaadhin badani, qoraalka ama lifaaqa Guddidu ay soo raacisay xeerka waanu kaga wada saarnay wixii is balaadhin ahayd ee xeerka ku jirtay.

Waxaanu ku soo koobnay in uu yahay Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda oo labadii Hay'adood ee kale waanu ka reebnay oo waxaanu sheegnay in uu xukuumadda uu lataliye u yahay sidoo kalana waxaanu sheegnay in uu wasaaradaha xeerarka ay soo diyaarsadaan uu jeeg-gareeyo.

Mudane Gudoomiye Sidaa ay mudanayaashu doodooda u dhiibanayaan ayaanu Xeerka u dhignee waa in xeerka la akhriyaa oo wixii aanu seegnay ee xadgudubka samaynaya waa in la sheegaa ama tilmaama.

Waxaanad moodaa in xeerka la akhriyine intaa la sheegayaaba waaanu sheegnay ee wixii na dhaafay ee aad aragtaan sheega mudanayaal u jeedadayadu waxay ahayd in aanu xeerka ku soo waabino waajibaadka Garyaqaanka guud oo aanu dhaafin xadkiisee sheega qodobada na dhaafay ee ah xadgudubka WSC.

**Gudoomiye Baashe;** Doodii wey dhamaatay Fadhigu wuu inoo xidhanyahay.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ______________________________ | ______________________________ |